



OGAYSIIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN CAABUQA KORONAFAYRAS(COVID-19) OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA KU NOOL NAWAAXIGA MAGAALOOYINKA

(Lasoo saaray: 9-ka Juuny2020)

Dowladda Kenya waxay fududeysay **xayiraadaha dhaqdhaqaaqa illaa heer, si kastaba ha noqotee, dhowr tilaabooyin ayaa wali jira** si looga hortago inuu sii fido Coronavirus (COVID-19), gaar ahaan:

- **Bandoow qaran oo guud ahaan inta u dhexeysa 9-ka fiidnimo iyo 4-ta aroornimo** Bandoowgu wuxuu jirayaa ilaa **6-da Luulyo 2020.**

- **Ma jiraan wax haqdhaqaaq ah soo galis iyo ka bixitaan intaba Nawaaxiga Magaalada Nairobi, iyo sidoo kale gobollada Mombasa iyo Mandheera.** Xayiraadan ayaa jiraysa ilaa iyo **6-da Luulyo 2020.**

- Waxaa sii **soconayya** dhaqdhaqaaq la'aanta galis iyo ka bixis intaba **xeryaha qaxootiga ee Kakuma iyo Dhadhaab.**

- **Xuduudaha dalka uu la wadaago Itoobiya, Soomaaliya, Koonfurta Suudaan, Tansaaniya iyo Yugaandha waa ay ka sii xirnaanayaan** dhaqdhaqaaqa dadka.

- **Waxaa xayiraadaha dhaqdhaqaaqa laga qaaday Xaafada Eastleigh ee Nairobi iyo Old Town ee Mombasa, iyo sidoo kale gobollada Kwale iyo Kilifi, waa la qaaday.**

Tirada kiisaska COVID-19 way sii kordheysaa, waana muhiim inaad la socoto oo aad u hogaansato tilmaamaha iyo xayiraadaha Dowladda Kenya si looga hortago faafitaanka. Run ahaantii, tan macnaheedu waa:

Tirada kiisaska cudurka Covid-19 ayaa sii kordhaysa, oo waxaa aad muhiim u ah inaad la socoto oo aad u **hoggaansanto tilmaamaha iyo xayiraadaha** Dowlada Kenya si aad uga caawiso ka hortagga faafitaanka. Run ahaantii, tani waxay la micno tahay:

- **Ku maydho gacmaha saabuun iyo biyo** si joogta ah.
- **Fadlan haku warwareegin meelaha si micno darro ah dharaartii.** Haddii ay daruuri tahay inaad baxdo, **xiro maskaraha wajiga** marka aad ku sugan tahay dhammaan **goobaha caamka ah** oo **wado warqadahaaga diinwaan-gelinta** markasta.
- **Haka qayb galin hana qabanin kulamada dadweynaha.** Haddii ay lagama maarmaan tahay inaad ka qayb gasho kulamada dadwaynaha, sida aaska ama aroosyada, iska hubi in dadka halkaas isugu imaanayya **aanu ka badnayn 15 qof.** **Xayiraadaan waxay sii jiri doontaa illaa 6-da Luulyo**
- **Lacalla haddii dowlada ay ka samayso baaritaan** goobo kala duduwan si loo xakameeyo faafitaanka cudurka Covid-19, oo adigana joogtid goobahaas, fadlan **wada shaqayn la yeelo shaqaalaha wasaarada caafimaadka.**

Tallaabooyinkaan waxaa loogu talo-galay **badbaadadaada** waana **dantaada.** Intaasi waxaa sii dheer, waxaa sidoo kale gacan ka gaysan doontaa yareynta faafitaanka cudurka Koronafayres (Covid-19) **Balse fadlan ogow inay jiraan tani ay kugu yeelan karto** haddii aadan u hoggaansamin tilmaamahaan oo ay ku jiraan:

- **Haddii aadan ku xiran maskaraha wajiga goobaha caamka ah, waxaa lagugu ganaaxayaa lacag dhan 20,000 Kenya Shilin** amaba wajihi kartaa 6 bilood oo **xabsi ah** ama labadaba.
- **Haddii aad ka qayb gasho kulan dadwayne halkaas oo ay isugu imaanayaan in ka badan 15 qof ama aad socotid saacadaha bandowga jiro ama isku daydid inaad u safarto amaba ka soo baxdid xeryaha qaxootiga ku yaalla Kakuma iyo Dadaab, waa lagu xiri karaa;** taa bedelkeeda waxaa dowlada ay kugu **karantiili kartaa** goobo loogu talo galay muddo 14 beri ah adigoo qarshka iska bixinayya.

Wakhtiyadaan Ayaan qofna u sahlamayn. Haddii aad caawimaad u baahato, fadlan eeg **lambarrada gergaarka degdegga ah ee soo socda:**

Diiwaangelinta / warqad-siinta degdegga ah: Xoghaynta Arrimaha Qaxootiga Shauri Moyo: 0772057770	Khadka Caawinta ee UNHCR: 0800720063 (bilaash ah)
Xaaladaha degdegga ee Caafimaad: NCK 0704873342 / 0723281352/ 0723281362	Arrimaha la xiriira Caymiska NHIF (Sanduuqa Caymiska ee Isbitaalaadka Qaranka): 0740049502
Xaaladaha degdegga ee la xiriirta sharciga (sida xiritaan, dhibaatayn boolis): Kituo cha Sheria 0720806531	Xaaladaha degdegga ee maciishada: Danish Refugee Council 0800720181
Khadka la Talinta: 1190/ 1199/ 0721 336017	Khadka Tooska ah ee Ilaalinta Caruurta: 116
Khadka Tooska ah ee Rabshadaha la Xiriira Jinsiga: 1195/ 0800720501	

Caabuqa COVID 19 wuxuu si toos ah ku faafaa dhibcaha (qufaca/hindhisada) ka imaanaysa qof qaba cudurka; si aan toos ahayn wuxuu ku fidaa iyada oo la taabto sagxadaha ama walxaha uu isticmaalay qof cudurka qaba. Haddii aad leedahay **mid ka mid ah calaamadaha Caabuqa** Korona(COVID-19) sida qandho, qufac, neef-tuur iyo neefsashada oo kugu adkaata, **fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka** halkaan 0800721316 (bilaasha ah); 0732353535; ama 0748592558 si lagu hago.